



Federal Republic of Somalia
Office of the President

XEER MADAXWEYNE LR.364

TAARIKH: 28/01/2021

ANSIXINTA 13KA KURSI EE LAGU KORDHINAYO GOLAH AQAALKA SARE EE METALAADDA
GOBOLKA BENAADIR

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: waajibka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ka saaran ilaalinta iyo horumarinta mabaadi' da asaasiga ee Dastuurka sida ku qeexan Qodobka 87(c);

MARKUU ARKAY: Shacabka Banaadir oo ka cabanaya takoorid lagu sameeyey Gobolka Banaadir oo aan wax mataad ah ku laheyn Aqalka Sare ee Baarlamaankii 10aad; annaga oo ogsoon in Dastuurka mamnuucay takoorid iyo sinaansho la'aan;

MARKUU ARKAY: Mataalaad la'aanta Gobolka Banaadir ee Aqalka Sare ay meel ka dhac ku tahay karaamada dadka ku nool Gobolka Banaadir iyada oo Faritaanka Dastuurka xaqlifyey karaamada aadanuhu inay tahay laguma xadgudbaan;

MARKUU ARKAY: go'aankii Golaha Wasiirada ee DFS ee 28kii Janaayo 2016 ee lagu guddoonsaday qoondaynta kuraasta Aqalka Sare ee looga reebay Gobolka Banaadir deegaanada kuraasta loo qoondeeyey uu liidi ku ahaa Cutubka Labaad ee Dastuurka oo qeexaya XUQUUQDA ASAAS/GA AH Qodobka 10aad gaar ahaan faqrada 3aad oo si cad u sheegeysa "Awoodda Dawladda waa in aan mamaba loo isticmaalin meel-uga-dhicid karaamada Aadanaha";

MARKUU ARKAY: Takoord saameysay qeybo ka mid bulshada Soomaaliyeed oo deegaankoodu ku kooban yahay Gobolka Banaadir oo sababtay in aysan habayaraatee mataalaad ku yeelan karin Aqalka Sare;

MARKUU GAROWSADAY: In Dastuurka Qodobkiisa 11aad ku dhiirigalinayo Xukuumadda talaabooyin "sinnaan buuxda lagu gaarsiyo dad ama kooxo horey loogu geystey takoond";

MARKUU ARKAY: Qodobka 22aad ee Dastuurka ee ciwaankisu yahay Xeqa Ka-Qaybgalka Siyaasadda oo silnaya muwaadiniinta ku nool Gobolka Banaadir xeqa inay wax doortaan lana dooran karo;

MARKUU ARKAY: mataalaad la'aanta Gobolka Banaadir in ay ka mid tahay caqabadaha hortaagan xasilinta iyo sugidda ammaanka Caasimadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;



Federal Republic of Somalia
Office of the President

MARKUU ARKAY: go'aanka Golaha Shacabka ee 27/06/2020 ay ku meelmariyeen Xeerka Matalaadda Gobolka Banaadir in matalaad 13 kursi ah laga siyo Gobolka Banaadir Aqalka Sare ee Baarlamaanka 11aad;

MARKUU ARKAY: Xeer Madaxweynaha Lr.38 ee soo baxay 21/05/2016 oo lagu meelmariyey Doorashada Dadban ee 2016 oo qodobkisa 2aad qeexayo in Muqdisho ku yeelato Aqalka Sare matalaad oo u qormaa 'In la ilaalio Mabda' Dastuuriga oo ah in Aqalka Sare ee Baarlamaanka ay matalaad ku yeeshaan dhammaan degaannada Soomaaliya oo ay ku jirto magaalada Muqdisho'.

WUXUU XEERIYEY:

1. Xuquuqda matalaadda Gobolka Banaadir ee Aqalka Sare waa xuquuq asaasi ah oo Dastuurku siliyey Gobol walba oo ka mid ah 18kii Gobol ee dalku lahaa 1991 sida uu qeexayo qodobka 72aad ee Dastuurka;
2. Si waafaqsan go'aankii Golaha Shacabka, Gobolka Banaadir wuxuu ku yeelanayaan Aqalka Sare ee Baarlamaanka 11aad matalaad 13kursi oo ku-meel gaar ah inta laga dhameystirayo Dib-u-eegista Dastuurka KMG ah;
3. Raysalwasaaraha Xukuumadda Federaalka waxaa la farayaa in Goihaa Wasirada DFS ay xeeriyaan habraac u gaar ah matalaadda Gobolka Banaadir oo ay ka muuqato isku dheelitirnaan bulshada Soomaaliyed.
4. Diyaarinta Habraaca iyo meelmarinta matalaada Gobolka Banaadir waa in lagu fuliyaa inta lagu guda jiro doorashada Aqalka Sare ee Baarlamaanka 11aad;
5. Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa marka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxixo.

MUQDISHO: 28/01/2021



Madaxweynaha J. F. S.
Maxamed Cabdullaahi Maxamed "Farmaajo"



Ref: ١٤٣٨/٠٩/B-١٠/٢٠

التاريخ Mogadishu, June 27, 2020

Ku: Wasaaradda Arrimaha Dastuurka
Muqdisho.

Ku: Guddiga La-socodka Dib-u-eegista iyo Dhaqangelinta Dastuurka
Muqdisho.

Ku: Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka
Muqdisho.

Ujeeddo: Ansixin Qaraarka Matalaadda Aqalka Sare ee Gobolka Banaadir
Mudaneeyaal;

Waxaan idinku wargelinaynaa inuu Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya go'aan ka gaaray ansixinta Qaraarka Matalaadda Aqalka Sare ee Gobolka Banaadir oo halkan ku lifaaqan, wuxuu Golaha Shacabka Kalfadhiga 7aad ee Fadhiisi 10aad ee 27^{ka} Juun 2020 oo ka dhacay Xaruntiisa Caasimadda Jamhuuriyadda ee Muqdisho ku ansixiyey cod furan oo u dhacay sidatan hoos ku xusan:

- Xildhibaan oggolaadeen: 142 (Boqol Afartan iyo Laba) Xildhibaan.
- Xildhibaan diidey: 4 (Afar) Xildhibaan
- Xildhibaan ka aamustay 0 – Xildhibaan.

Naga guddooma salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.


M.ne Maxamed Mursal Sh. Cabdiraxmaan
Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya

Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Og: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho

Og: Xildhibaannada Golaha Shacabka
L/H. Golaha Shacabka.





**JUMHURIYADDA FEDERAALKA
SOOMAALIYA**

GOLAHA SHACABKA

QARAAR KU SAABSAN

ANSIXINTA

**MATALAADDAA AQALKAA SARE EE
GOBOLKA BANAADIR**

Muqdisho, 27^{ka} Juun 2020

GOLAHA SHACABKA SOOMAALIYA

Markuu Arkay:

Qodobka 12aad Faqradda 6aad ee Sharciga Doorashooyinka Qaranka ee Heer Federaal oo dhigaya in Xuquuqda matalaadda Aqalka Sare ee Gobolka Banaadir Xeer lagu soo saaro.

Markuu Dhageystay:

Warbixinta Guddiga Diyaarinta Xeerarka Dhammaystirka Sharciga Doorashooyinka Qaranka ay u soo bandhigeen Kulanka Guud ee Golaha Shacabka.

Markuu Dhageystay:

Dooddii saddexda maalmood socotay iyo tallooyiinkii ay Xildhibaannada Golaha Shacabka ka dhiibteen in Gobolka Banaadir uu matalaad ku yeesho Aqalka Sare ee BJFS.

Markuu Tixgeliyey:

In ay lagama maarmaan tahay in Shacabka ku nool Gobolka Banaadir ay matalaad ku yeeshaan Aqalka Sare ee Baarlamaanka JFS.

Saa Daraadeed:

Golaha Shacabka Kalfadhigiisa 7aad Kulankiisa 10aad ee 27^{ka} Juun 2020 oo ay goobjoog yihiin Boqol Afartan iyo Lix (146) xildhibaan wuxuu guddomiyey oo ansixiyey Qodobbada soo socda:

Qodobka 1aad:

Matalaadda Aqalka Sare ee Gobolka Banaadir

Sida ku cad Qodobka 12aad Faqradda 6aad ee Sharciga Doorashooyinka Qaranka ee Heer Federaal, Gobolka Banaadir wuxuu 13 xubnood ku yeelanayaan Aqalka Sare muddo xileedkiisa 2aad ee 2021 Baarlamaanka 11aad JFS taas oo tirada guud ka dhigeysa Lixdan iyo Todoba (67) xubnood, iyadoo la waafajinayo Dastuurka KMG, waxaana xubnaha si toos ah, qarsoodi ah oo madaxbannaan u dooranaya Shacabka Gobolka Banaadir.

Qodobka 2aad:

Dhaqangalka Qaraarka

Qaraarkani wuxuu dhaqangalayaan ka dib markii uu Golaha Shacabku ansixiyo, Guddoomiyaha Golaha Shacabkuna saxiixo.

M.n Maxamed Mursal Sh. Cabdiraxmaan
Guddoomiyaha Golaha Shacabka Soomaaliya

